

Xeerka Madaxweynaha Jamhuuriyada ku Meel Gaarka ah lamba. 206 ee 16 Oktoobar 1969

Igmashada Xilka ku Meel Gaarka ah ee Madaxweynaha Jamhuuriyadda ee Guddomiyaha Golaha Qaranka

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda ku Meel Gaarka ah
Sheekh Mukhtar Maxamed Xuseen**

Kadib markii la arkay amarka ku taarikhsan 16 Oktoober ee 1969 oo lagu aqoonsaday jagada Guddomiyaha Golaha Qaranka, go'aanka Golaha Wasiiradaha ee ku taarikhsan 15 Oktoobar 1969 oo lagu caddeyey geerida Dr. Abdirashid Ali Shermarke, Madaxweynihi Jamhuuriyadda oo dhacday 15 Oktoobar 1969.

Kadib markii la arkay qodobka 74 ee Dastuurka.

WUXUU CADDEYEY

In uu la wareegi doono xilka si ku meel gaar ah ilaa iyo intii Madaxweyne cusub ee Jamhuuriyadda laga dooran doono.

Muqdisho, 16 Oktoobar 1969.

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda ee ku meel gaarka ah
Sh. Muqtar Mohamed Hussein**

**Rai'sul Wasaraha ku meel gaarka ah
Yasin Nur Hassan**